



Cabot's core values are:
Partnership Inclusion Excellence



Cabot Primary School

Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.excalibur.org.uk

Talaada 21^{ka} Oktoober 2025

Gacaliyayaal Qoysas,

Aad ayaad ugu mahadsan tihiin caawinaaddiina Xilligaan. Carruurta si wanaagsan ayey dugsiga ula qabsadeen waxbarashadiina si wanaagsan ayey ku billaabatay. Waxaan dhawreynaa inaan kulanno marka laguugu casuumo maalinta khamiista saacadda 3:00 fasallada markaas oo laguugu casuumaayo inaad aragto buugaagta carruurtaada iyo mar kale wada-xaajoodka qoysaska usbuuca billaabanaaya 10^{ka} November.

Waxaa na soo maray Xilli mashquul ah oo ay ku jiraan naadiyada dugsiga dabadiisa ee ciyaaraha ah, heesaha KS2 iyo Matt Goodfellow, Qoraa soo booqanaaya Cabot. Fadlan ka hubi taariikhaha xusuus-qorka dhacdooyinka kale ee soo socda.

Xusuusin inaad isticmaasho cuntooyinka tabaruca maalinta Jimcaha ee loogu talo galay bulshadeenna oo dhan marka fadlan noqo qof tixgelinaaya dadka kale si dhammaan looga wada faa'ideeysto.

Ku raaxeeyso fasaxa soo socda waxaanna kulmi doonnaa maalinta 3^{da} Noofember.

Mahadsanidiin,

Mrs L-H

Maalinta Akhrinta ee Sannadka

Tan waa maalin qaran. Cabot ahaan waxaan jecelnahay akhrinta maxaa yeelay waxay leedahay faa'idooyin badan. Akhrinta waqtiga canugga fasaxa waxay ka caawintaa waxbarashada iyo rajada mustaqbalka ee shaqo. Akhrinta waxay kor u qaaddaa sama-ku-nagaanshaha, kalsoonida iyo ku xirnaanteenna dunida nagu xeeran. Dugsiga, waxaan carruurta ku barnaa xirfadaha ay ugu baahan yihiin akhrinta. Marka sidee ayaad guriga uga caawineysaa? Sameey waqti go'an oo la demiyo TV, taleefannada la fogeeyo carruurtana ay doortaan waxa ay akhriinaayaan ayna kaala hadlaan akhrinta. Booqo maktabadaha at St Paul's iyo Junction 3. Buugaagta, joornaallada, noofallada, , ebooks, buugaagta-maqalka la socdo – dhammaantood waa muhiim!



Taariikhaha Xusuus-Qorka

23^{da} Oktoobar – qoysaska casuumaaddooda fasallaka.
Usbuuca billaabanaaya (u/b) 27^{da} Oktoobar fasaxa Xilliga – dugsi ma jiro.
3^{da} Nof. – ku soo laabasho dugsi.
u/b 10^{ka} Nof. – La tashiga qoysaska Isniinta iyo Arbacada; iyo usbuuca ka hortagga xadgudubka.
17^{da} Nof. Subaxa Qaxwada ay hoggaaminaayaan Kooxda Kaalinta Caafimaadka Maskaxda
17^{ka} Dis – bandhigga xilliga qaboobaha ee qoysaska KS1.
18^{ta} Dis – qadada kiristimaska.
19^{ka} Dis – maalinta ugu dambeysa ee xilliga.
u/b 22^{da} Dis ilaa 29^{ka} Dis fasaxa qaboobaha.
5^{ta} Jan – maalin INSET – dugsi ma jiro.
6^{da} Jan – ku soo laabasho dugsi.



Imaanshaha

Celceliska imaanshaha dugsiga usbuucii hore wuxuu ahaa **95%** taasoo u dhaw **yoolkeenna 96%**. Aad ayaad ugu mahadsan tihiin caawinaaddiina arrintaan . **F1 iyo F3 ayaa gaarya yoolk 96% – hambalyo weyn F6 oo gaaray imaansho 99%.**

Waxaan ognahay in filashada Dowladda iyo Cabotay yihiin in carruurta dugsiga yimaadaan maalin walba marka laga reebo marka ay aad u xanuusan yihiin.

Haddii canuggaada uu buko uuna dugsiga imaan karin, fadlan xafiiska dugsiga kala soo xiriir 01173772630 si aad noogu sheegto. Waxaa laga yaabaa in aan guriga kugu soo booqanno haddii aan war kaa helin waxaana laga yaabaa in aan sameyno booqasho bad-qab hubin haddii uu canuggaada maalmo badan xanuunsan yahay.

Fasaxyada waa in tikidka la goostaa waqtiga uu dugsi fasax yahay, ganaax ayey kuu soo diri kartaa Xukuumadda Deegaanka haddii canuggaada uu dugsiga imaaneynin. Ma dooneyno in mid ka mid ah caruurta uu seego xaqooda.

Fadlan ku baraarugsanoow

Waxaa naloo sheegay in bugaagta Spy Dog and Cat ay leeyihiin mareegto ku geeyneysa bog websayd. Websaydkaan waa la jabsaday, soo-saaraha ayaa hadda ku mashquulsan in uu bogga meesha ka saaro. Haddii aad guriga ku haaysato mid ka mid ah buugaagtaas, fadlan hubi in uu canuggaada uu ku gelin websaydka QR code buugga ku daabacan.



Heeso

Miss Pimenta waxay billaawday heeso ardayda KS2 kuwaasoo baranaaya heeso waqtiga qadada hal maalin usbuucii si ay uga qeyb galaan bandhigga xilliga qaboobaha ee ka dhacaaya Bristol Beacon bisha Diisember. Waxaa jiray daneyn badan ee carruurta dhinacooda ah waxaana jiri doona akhbaar lagu soo diro doono haddii uu canuggaada is-qoray.

Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumbo warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630